



# **Golaha Waxbarashada PPS Waxay Tixgalin Siin Doonaan Janaayo 31keeda Inay Ka Noqoto Maalinta Jawiga Waxbarashada iyo Bulshada Dugsiyada- Fasaladii Waxbarashadu Ma Jiri Doonaan.**

Bulshada Qaaliga ah ee PPS,

Golaha Waxbarashada PPS waxay tixgalin siin doonaan qaraar iman doona kulanka la qabanayo maalinta Isniinta, Janaayo 21keeda inay noqoto maalinta jawiga waxbarashada dugsiga iyada oo shaqaaluhu ay shaqeyn doonaan, laakiinse ardaydu maalintaasi waa fasax.

Haddii golaha waxbarashadu ay ansixiyaan tallo soo jeedintani ka timid hoggaanka PPS, maalintaasi waxay noqon doontaa maalin ay ardaydu fasax yihiin balse shaqaaluhu ay ka shaqeyn doonaan qorsheynta. Waxay u oggolaan doontaa dugsiyada inay sii wadaan shaqadii ay dhismayaal gaar ka qaban jireen si ay u qorsheeyaan jawiga waxbarashada iyo sida loo qaadanayo casharada waxbarashada ee lagu taageri lahaa baahiyaha ardayda.

Maalinta qorsheynta jawiga waxbarashada iyo bulshada ee dugsiyada waxay noqon doontaa maalinta ugu horeysa simistartka labaad ee sanad-dugsiyeedka 2021-22. Maalinta Jimcaha, Janaayo 28, iyada hore ayaa jadwalkeeda loo diiwaangaliyey inay noqoto maalinta ugu dambeysa simistartka ee la ururinayo dhibacaha imtixaanada ardayda iyo qorsheynta. Ardaydu waa inay dugsiga qof ahaan ugu soo noqdaan bisha Febraayo 1deeda.

Golaha Waxbarashadu waxay qaban doonaan kulan gaar ah sidii ay ugu codeyn lahaayeen qaraarka maalinta Tallaadada, Janaayo 18keeda, saacadu marka ay tahay 4:45 p.m., inta ayna Golaha Waxbarashadu bilaabin kulankooda fasaxa. Haddii aad rabtaan inaad faalo ka dhiibataan, fadlan waxaad email u dirtaan [PublicComment@pps.net](mailto:PublicComment@pps.net) ama waxaad soo wacaam telefoonka Xafiiska Golaha ee 503-916-3741. Kulankani waxaad si toos ah uga daawan doontaa [PPS YouTube page](#).